

# Masuulka carruurta

**Caadi ahaa ayaa waalidka ilmahu uu ka yahay masuulka ilmaha iyaga oo u maamulaaya waxa uu ilmahu leeyahay. Marka uu ilmahu gaadho 16 sanno jir ayay tahay inuu ilmahu ka qeyb qaato oo uu saameyna ku yeesho go'aamada muhiimka ah.**

Xeerka ugu muhiimsan sharciga Xeerka waalidka waxa uu odhanayaa in haddii ay waalidku masuul ka yihiin ilmaha ay go'aaminayaa iyagu sida ay u isticmaalayaan lacagta ilmaha. Taas waxa loo yaqaanaa maamulida xorta ah.

## Maamulida xorta ah

Maamulida xorta ahi waxa weeye in uu waalidku isticmaalo lacagta ilmaha waxa u danta u ah ilmaha. Laakiin waalidku iyagu naftoodu ma amaahan karaan lacagta ilmaha. Waalidku waxay maamulayaan lacagta ilmaha iyaga oo masuuliyada magdhowga qaba. Taas micnaheedu waxa weeye in ilme uu ka dalban karo magdhow waalidkii haddii aaney waalidku lagactaa si wanaagsan u daryeelin.

Marka uu ilmahu haysto lacag ka badan 8 dhibcood ayay tahay in waalidku taas wargaliyaan waaxda masuuliyada sare. Sanadka 2015 ayuu qadarka aasaasiga ahi yahay 44 500 karoon.

## Dhaxalka

Haddii uu ilmahu helo lacag dhaxal ah, wax loogu dardaarmey ama caymis oo uu markaa qadarku ka badan yahay hal dhibic ayay cida bixinaysaa ku shubaysaa lacagta koonto xidhan oo bangi. Taas kadib ayay waalidku ka dalban karaa waaxda masuuliyada sare inay lacagta la soo baxaan.

Haddi waalidku uu u ogolaado inuu ilmahu soo iibsado, iska iibiyo, ama hanti deyn ku qaato, dhul iibsado ama hadhka guriga, ayay tahay in waaxda masuuliyada sare marka hore haa tidhaado. Taasi waxay khuseysaa xataa haddii ilme buuxiyey 16 sanno uu bilaabaayo shirkad. Ogolaansho ayaa loo baahan yahay xataa marka ilmahu uu amaah qaadanaayo ama marka lacagta ilmaha cid la amaahinaayo. Haddii ilmahu uu lacag dhaxlo waa in waaxda masuuliyada sare ay ogolaato dhaxalka.

# Kala soo xidhiidh xafiiska mas'uulka guud iyo gudiga

**Cinwaanka boostada:** Linköpings kommun  
Överförmyndarenheten Linköping  
581 81 Linköping

**Cinwaanka booqashada:** St:Larsgatan 41

**Telefoonka:** 013-20 69 99.

**Bogga internetka:** [www.linkoping.se](http://www.linkoping.se)

**Emaylka:** [overformyndarenheten@linkoping.se](mailto:overformyndarenheten@linkoping.se)